

# Samaynta Bayaanka Shakhsi ahaaneed ee Dhibbanaha

**Fursadda aad u leedahay in aad macnayso sida uu dembigu kuu saameeyey**

**VPS. Dembi kasteba dhibbane ayuu leeyahay. Dhibbane kastena waxuu u qalma cod uu ku hadlo.**

## Wixii buugyarahan ku saabsan

Marka aad dembi dhibbane u noqoto, waxuu kaasi kuu saamayn karaa siyaabo farabadan oo kaladuwan – matalan shucuur ahaan, maaliyad ahaan ama jir ahaan.

Samaynta Bayaanka Shakhsi ahaaneed ee Dhibbanaha (Victim Personal Statement) (VPS) ayaa ah hab aad dareennadaada qoraal ugu dhigan karto. Hay'adaha caddaaladda dembiyeed ee kiiskaaga ku lug leh (sida booliiska, xeer-ilaaliyaha ama maxkamadaha) ayuu ka caawin doonaa in ay fahmaan saamaynta uu dembigu idinku yeeshay adiga iyo qoyskaaga. Waxaannu sidaas u hubin karnaa in aad hesho taageerada aad u baahan tahay.

## Waxa uu buugyarahani samaynayo

Waxuu buugyarahani sharxayaa waxwalboo aad u baahan tahay in aad ka ogaato bayaanka VPS – waxa uu yahay, sida uu u shaqeeyo iyo waxa aannu ku samayn doonno warbixinta aad na siiso.

Waxaad ka heli doontaa jawaabaha qaar ka mid ah su'aalaha caadi ahaan la isweydiiyo iyo hagis ku saabsan sida bayaanka VPS loo sameeyo. Dhabarkiisa, waxaa ku yaalla macluumaadka xiriirka ee aad adeegsan karto haddii aad su'aalo qabto ama u baahan tahay taageero dheeraad ah.

# Making a Victim Personal Statement

**Your chance to explain how the crime has affected you**

**VPS. Every crime has a victim. Every victim deserves a voice.**

## About this leaflet

When you are a victim of a crime, you can be affected in many different ways – for example emotionally, financially or physically.

Making a Victim Personal Statement (VPS) is a way in which you can put your feelings on record. It will help criminal justice agencies involved in your case (like the police, the prosecutor or the courts) to understand the impact that the crime has had on you and your family. That way we can make sure you get the support you need.

## What this leaflet does

This leaflet explains everything you need to know about the VPS – what it is, how it works and what we will do with the information you give us.

You will find answers to some commonly asked questions and guidance on how to make a VPS. At the back, there is contact information in case you have any questions or need any extra support.

**Waxaa cilmibaaris lagu muujiyey in dadka sameeyey bayaanka VPS intooda ugu badan ay dareemeen in uu saamayn wax ku ool ah uga keenay dhacdada ka soo martay Nidaamka Caddaaladda Dembiyeed (Criminal Justice System).**

## **Wixii ku saabsan bayaanka VPS**

### **Waa maxay bayaanka VPS?**

Bayaanka VPS waa bayaan aad siin karto booliiska haddii aad dembi dhibbane u noqotay. Waxuu ka duwan yahay bayaanka markhaatida ee laga yaabo in aad ka bixisay dembiga, kaasoo ah warbixin qoraal ama fiidiyow lagu duubo oo ku saabsan waxa dhacay. Bayaanka VPS waa diiwaangelinta saamaynta shakhsi ahaaneed ee dembigu uu idinku yeeshay adiga iyo qoyskaaga. Waxuu fursad kuu siinayaa in aad, hadalkaaga, ku macnayso sida uu dembigu kuu saameeyey – haddii ay noqoto jir ahaan, shucuur ahaan, maaliyad ahaan ama si kaleba.

### **Waa maxay sababta uu muhiim u yahay?**

Bayaankaaga VPS waa muhiim maxaa yeelay dhammaan dadka ku lug leh kiiska – booliiska, xeer-ilaaliyaha iyo maxkamadda – ayuu ka caawin doonaa in ay fahmaan saamaynta uu dembigu ku yeeshay noloshada. Waxuu kaasi iyaga ka caawin doonaa in ay go'aanno muhiim ah ka gaaraan kiiska (fiiri qaybta 'Miyuu waxtar u yeelan doonaa kiiska?' ee bogga 3aad).

Bayaanka VPS waxuu qayb ka noqon doonaa waraaqaha kiiska, markaa haddii kiiskaaga maxkamadda la geeyo, waxaa loo diri doonaa looyarka eedaysanaha (fiiri qaybta 'Sida loo isticmaali doono bayaankaaga VPS' ee bogga 4aad).

**Research shows that the majority of those who made a VPS felt that it had a positive effect on their experience of the Criminal Justice System.**

## **About the VPS**

### **What is a VPS?**

The VPS is a statement that you can give to the police if you have been a victim of crime. It is different from the witness statement you may already have given about the crime, which is a written or video-recorded account of what happened. The VPS is a record of the personal impact that the crime has had on you and your family. It gives you a chance to explain, in your own words, how the crime has affected you – whether physically, emotionally, financially or in any other way.

### **Why is it important?**

Your VPS is important because it will help everyone involved in the case – the police, the prosecutor and the court – to understand the impact that the crime has had on your life. This can help them to make important decisions about the case (see 'Will it make a difference to the case?' on page 3).

The VPS will form part of the case papers, so if your case goes to court, it will be sent to the defendant's solicitor (see 'How your VPS will be used' on page 4).

## Maxaan ku sheegi karaa bayaankayga VPS?

Wax kastoo aad rabto ayaad ka sheegi kartaa sida uu dembigu kuu saameeyey. Matalan, waxaad rabi kartaa in aad soo hadal qaaddo:

- dhaawaca jirka ama cilminafsiyeedka ee ku soo gaaray
- haddii aad dareensan tahay nugayl ama cabsigelin
- haddii aadan dib u dareemayn in aad badbaadsan tahay
- saamaynta qoyskaaga
- sida ay isku beddeshay tayada nolashaada ee maalinba maalinba ku xigta
- haddii aad ka welwel qabto damiinashada loo oggolaaday eedaysanaha dembiga
- haddii aad dareensan tahay in dembigu uu ku sal lahaa jinsiyadda ama in diintaada, jihadaada galmada ama naafonimadaadu ay qayb ku lahaayeen dembiga
- haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah, matalan maadaama aad markhaati ahaan u imanayso maxkamadda
- haddii aad ku talajirto in aad magdhaw ka dalbato eedaysanaha dembiga kaasoo aad u rabto dhaawaca, khasaaraha ama waxyeellada ku soo gaaray.

Hase yeeshee, bayaankaaga VPS waa in aadan ku darin fikradaha ama ra'yiga aad ka qabto sida habboon in loo ciqaabo eedaysanaha dembiga – taas go'aankeeda waxaa iska leh garsooraha ama xaakinka.

## Miyuu waxtar u yeelan doonaa kiiska?

Bayaankaaga VPS waa muhiim waxuuna waxtar u yeelan karaa kiiska. Hay'adaha caddaaladda dembiyeed ee kiiskaaga ku lug leh (sida booliiska, xeer-ilaaliyaha ama maxkamadaha) ayuu ka caawin doonaa in ay fahmaan sida uu dembigu kuu saameeyey. Waxay taasina, markaa, hagi doontaa go'aannada ku saabsan haddii si rasmi ah loo eedaynayo eedaysanaha dembiga, ama loo oggolaanayo damiinashada eedaysanaha.

## What can I say in my VPS?

You can say whatever you like about how the crime has affected you. For example, you might want to mention:

- any physical or psychological injury you have suffered
- if you feel vulnerable or intimidated
- if you no longer feel safe
- the impact on your family
- how your quality of life has changed on a day-to-day basis
- if you are worried about the alleged offender being given bail
- if you feel that the crime was racially motivated or that your faith, sexuality or disability played a part in the crime
- if you need additional support, for example because you are appearing as a witness at the trial
- if you intend to claim compensation from the alleged offender for any injury, loss or damage you've suffered.

However, your VPS should not include your thoughts or opinion on how the alleged offender should be punished – this is for the magistrate or judge to decide.

## Will it make a difference to the case?

Your VPS is important and could make a difference to the case. It will help the criminal justice agencies involved in your case (like the police, prosecutor or courts) to understand how the crime has affected you. This can, in turn, inform decisions on whether to charge an alleged offender, or grant a defendant bail.

## **Miyuu bayaankayga VPS raad ku yeelan karaa xukunka eedaysanaha lagu soo rogo?**

Xukunka eedaysanaha lagu soo rogayo waxaa go'aan u leh maxkamadda. Hase yeeshee, xaakinka ama garsooruhu waxuu tixgelin doonaa sida uu dembigu noloshaada u saameeyey marka uu xukun eedaysanaha ku soo rogayo – taasoo barbar socon doonta gebi caddaynta kale ee ka jirta kiiska iyo tilmaanbixinta habboon ee u taalla xukunka eedaysanaha lagu soo rogayo. Lama tixgelin doono ra'yigaaga (ama ka qaraabadaada kuugu dhow) ee ku saabsan xukunka kula habboon in eedaysanaha lagu soo rogo.

## **Sida loo isticmaali doono bayaankaaga VPS**

### **Maxaa lagu qaban bayaankayga VPS marka aan sameeyo?**

Ka dib marka aad bayaankaaga samayso, waxuu qayb ka noqonayaa waraaqaha kiiska. (Hase yeeshee, macluumaadka qaarkood, sida macluumaadkaaga xiriirka, laguma dari doono.)

Waxay taasi ka dhigan tahay in bayaankaaga ay arki doonaan dhammaan dadka ku lug leh kiiska, xataa eedaysanaha iyo looyarkiisa(radiisa), booliiska, adeegga ciqaabmarinta, iyo xaakinka ama garsooraha haddii kiiska maxkamadda la geeyo.

Hase yeeshee, bayaankaaga VPS waxay maxkamaddu tixgelin doontaa uun haddii eedaysanuhu dembiga ku qirto dhegeysiga ama ay maxkamaddu dembiga ku soo hesho.

### **Miyaa su'aalo la iga weydiin karaa bayaankayga VPS?**

Haa. Maxkamadda ama kooxda eedaysanaha ayaa su'aalo kaa weydiin kara waxa ku jira bayaankaaga VPS si ay u caddeeyaan ama uga doodaan qodobbada qaarkood.

## **Can my VPS influence the sentence?**

Sentencing is for the court to decide. However, the judge or magistrate will consider how the crime has affected your life when passing the sentence – along with all the other evidence in the case and the relevant sentencing guidelines. Your (or your close relatives') opinion on what you think the sentence should be will not be taken into account.

## **How your VPS will be used**

### **What happens to my VPS once I've made it?**

After you have made your statement, it becomes part of the case papers. (However, certain information, like your contact details, will not be included.)

This means that your statement will be seen by everyone involved in the case, including the defendant and their lawyer(s), police, prosecution, and the judge or magistrate if the case goes to court.

However, your VPS will only be considered by the court if the defendant either pleads guilty at the hearing or is found guilty by the court.

### **Can I be questioned about my VPS?**

Yes. The court or the defence could ask you questions about the content of your VPS to clarify or challenge certain points.

## **Samaynta iyo cusboonaysiinta bayaanka VPS**

### **Goormeen sameeyaa bayaanka VPS?**

Waxay booliisku ku weydiin doonaan haddii aad rabto in aad bayaanka VPS samayso, caadi ahaan ka dib marka ay kaa qaadaan bayaanka markhaatida. Waxay kaa caawin karaan in aad samayso bayaanka VPS ama waxay ku siin karaan taageerada aad u baahan tahay si lagaaga caawiyo in aad bayaanka samayso.

### **Miyay khasab igu tahay in aan bayaanka VPS sameeyo?**

Khasab kuguma aha in aad bayaanka VPS samayso haddii aadan rabin – ikhiyaar ayaad u leedahay. Dembigu waxuu dadka u saamayn karaa siyaabo kaladuwan, waxaana laga yaabaa in aad rabto in aad si duwan u sheegto waxa aad dareensan tahay.

Haddii aad go'aansato in aadan samaynin bayaanka VPS, taasi ma saamayn doonto baaritaanka kiiska. Qofna taas kalama soo bixi doono ama uguma qaadan doono, matalan, in uusan dembigu ku saamaynin.

Hase yeeshee, waxaa cilimibaaris lagu muujiyey in dadka sameeyey bayaanka VPS intooda ugu badan ay dareemeen in uu saamayn wax ku ool ah uga keenay dhacdada ka soo martay Nidaamka Caddaaladda Dembiyeed.

### **Maxaa dhacaya haddii aan go'aankayga ka noqdo?**

Haddii aad doorato in aadan islamarkaaba samaynin bayaanka VPS, ha ka welwelin. Waxaa marwalba kuu furan in aad goor dambe codsato in aad mid samayso. Haddii aad go'aansato in aad taariikh dambe samayso bayaanka VPS, la xiriir askariga booliiska ee kiiskaaga ka masuul ah (ku yaalla bogga 7aad) una sheeg in aad rabto in aad samayso bayaanka VPS. Waxaad askariga weydiisan kartaa in uu kugu soo noqdo si uu kuu arko oo uu kaa caawiyo in aad samayso bayaanka VPS.

## **Making and updating a VPS**

### **When do I make a VPS?**

The police will ask you whether you want to make a VPS, usually after they have taken your witness statement. They can help you to make a VPS or give you the support that you need to help you make a statement.

### **Do I have to make a VPS?**

You don't have to make a VPS if you don't want to – it is your choice. Crime can affect people in different ways, and you might want to express how you feel in a different way.

If you decide not to make a VPS, it will not affect the investigation of the case. No one will draw any conclusions or assume, for example, that you are unaffected by the crime.

However, research shows that the majority of those who made a VPS felt that it had a positive effect on their experience of the Criminal Justice System.

### **What happens if I change my mind?**

If you choose not to make a VPS straightaway, don't worry. You can always ask to make one later on. If you decide to make a VPS at a later date, contact the police officer in charge of your case (shown on page 7) and tell them that you would like to make a VPS. You can ask the officer to come back to see you and to help you make a VPS.

Haddii kiiskaaga maxkamadda la soo marinayo (taasoo dhacaysa marka eedaysanuhu uu dembiga qiran waayo), Cuntubka Daryeelka Markhaatida (Witness Care Unit) ayaa ku weydiin doona haddii lagu soo bandhigay fursad aad ku samayso bayaanka VPS waxayna fursad kuu siin doonaan in aad mid samayso ama cusboonaysiiso.

Bayaanka VPS waxaa la samayn karaa, ama la cusboonaysiin karaa, waqti kastoo ka horreeya inta aanay maxkamaddu xukun ku soo rogin eedaysanaha dembiga. Markaa ha la daahin in aad samayso bayaanka VPS. Haddii eedaysanuhu uu dembiga ku qirto dhegeysiga ugu horreeya, waxaa laga yaabaa in xukun lagu soo rogo ka hor inta aadan fursad u helin in aad samayso bayaanka VPS.

### **Sideen u samayn karaa bayaankayga VPS?**

Haddii aad samayso bayaankaaga VPS ee ugu horreeya islamarka aad samaynayso bayaankaaga markhaatida, waxaa bayaanka VPS lagaaga qaadi doonaa isla sida kan kale – qoraal, fiidiyow ama iyadoo la isticmaalayo turjumaan. Askari booliis ayaa kaa caawin kara in aad taas samayso.

### **Miyaan la noqon karaa ama wax ka beddeli karaa bayaankayga VPS?**

Maya. Marka aad bayaanka VPS samayso, lama noqon kartid waxna kama beddeli kartid. Hase yeeshee, waxaad samayn kartaa bayaan dheeraad ah oo aad ku kala caddaynayso ama ku saxayso bayaankaagii asalka ahaa waqti kastoo ka horreeya inta aanan maxkamadda la tegin. Bayaanka dheeraadka ah waxaa lala diri doonaa bayaankaaga VPS ee asalka ah.

Waxaad weliba samayn kartaa bayaan VPS oo labaad haddii aad rabto in aad si buuxda u macnayso saamaynta dembiga ee suurogal ah in aanay caddaan hore u ahayn – matalan haddii saamaynta mustaqbalka sii fog ay iminka uun kugu soo baxayso, haddii khasaaraha maaliyadeed uu sii kordhay (ama yaraaday), ama haddii aad ka welwel qabto in eedaysanaha dembiga loo oggolaado damiinasho.

Bayaanka VPS ee labaad waxaa caadi ahaan lagaaga qaadi doonaa qoraal.

If your case is going to trial (which happens when the defendant pleads not guilty), the Witness Care Unit will ask if you have been offered the chance to make a VPS and give you the opportunity to make one or update it.

A VPS can be made, or updated, at any time before the alleged offender is sentenced by the court. So don't delay in making a VPS. If a defendant pleads guilty at the first hearing, they may be sentenced before you've had the chance to make a VPS.

### **How can I make my VPS?**

If you make your initial VPS at the same time as you make your witness statement, the VPS will be taken in the same way – in writing, by video or through an interpreter. A police officer can help you to do this.

### **Can I withdraw or change my VPS?**

No. Once you have made a VPS, you can't withdraw or change it. However, you can make an additional statement that clarifies or amends your original statement at any time before the trial. The additional statement will be submitted along with your original VPS.

You can also make a second VPS if you want to describe the full impact of the crime that may not have been obvious beforehand – for example if the longer-term effects are only now becoming apparent, there is a greater (or lesser) financial loss, or you're worried about the alleged offender being granted bail.

A second VPS will usually be taken in writing.

## **Xiriirka booliiska**

Kani waa xiriirka booliiska ee loogu talagalay wax kastoo la xiriira bayaankaaga VPS. Askariga wax ka qabanaya bayaankaaga ayaa kan buuxin doona. Fadlan macluumaadka meel adag ku hayso.

**Xiriirka ugu horreeya ee booliiska lala yeesho**

Magaca askariga booliiska: \_\_\_\_\_

Lambarka telefoonka ee saldhigga booliiska: \_\_\_\_\_

**Askariga booliiska ee wax ka qabanaya kiiska (haddii uu ka duwan yahay kan kore)**

Magaca askariga booliiska: \_\_\_\_\_

Darajada askariga booliiska: \_\_\_\_\_

Lambarka telefoonka ee askariga booliiska: \_\_\_\_\_

**Faahfaahinta kiiska dembiga**

Lambarka tixraaca ee kiiska dembiga: \_\_\_\_\_

Lambarka telefoonka ee miiska dembiyada: \_\_\_\_\_

## **Police contact**

This is the police contact for anything related to your VPS. The officer dealing with your statement will fill this in. Please keep the details safe.

**Initial contact with the police**

Name of police officer: \_\_\_\_\_

Phone number of police station: \_\_\_\_\_

**Police officer dealing with the case (if different from above)**

Name of police officer: \_\_\_\_\_

Rank of police officer: \_\_\_\_\_

Phone number of police officer: \_\_\_\_\_

**Crime case details**

Crime case reference number: \_\_\_\_\_

Phone number of crime desk: \_\_\_\_\_



## Warbixin dheeraad ah

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan bayaanka VPS, la xiriir xiriirka booliiska ee ku xusan bogga 7aad ama la hadal xubin ka mid ah kooxda booliiska ee xaafaddaada. Maadaama aad dembi dhibbane u noqotay, askarta booliisku waxay aad diyaar ugu ahaan doonaan in ay kula taliyaan hagnisna ku siiyaan si aad u hesho gargaarka iyo taageerada ee aad u baahan tahay.

Waxaad weliba la hadli kartaa Taageerada Dhibbanaha (Victim Support), hay'addaasoo mutaddawiciinteeda si gaar ah loogu tababaray in ay gargaar camali ah iyo taageero shucuureed siiyaan dhibbaneyaasha dembiyada iyo markhaatida marka ay maxkamadda joogaan. Qorshaha Taageerada Dhibbanaha (Victim Support Scheme) ee xaafaddaadu waxuu ku taxan yahay buugga telefoonada ee xaafadda, ama soo wac khadka Taageerada Dhibbanaha (Victim Supportline) oo ah **0845 30 30 900**.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan bayaanka VPS waxaad ka heli kartaa bogga internetka ee Nidaamka Caddaaladda Dembiyeed oo ah [www.cjsonline.gov.uk/victim/coming\\_forward/victim\\_personal\\_statement](http://www.cjsonline.gov.uk/victim/coming_forward/victim_personal_statement)

**Waxaa buugyarahan weliba lagu heli karaa dhowr luqadood oo kaladuwan. Weydiiso booliiska haddii aad nuskhad kale rabto.**

## More information

**If you have any further questions about the VPS, get in touch with the police contact shown on page 7 or talk to any member of your local police team. As a victim of crime, police officers will be more than willing to advise you and guide you to get the help and support you need.**

You can also talk to Victim Support, whose volunteers are specially trained to provide practical help and emotional support to victims of crime and witnesses in court. Your local Victim Support Scheme is listed in the local phone book, or call the national Victim Supportline on **0845 30 30 900**.

You can find more information about the VPS on the Criminal Justice System website at [www.cjsonline.gov.uk/victim/coming\\_forward/victim\\_personal\\_statement](http://www.cjsonline.gov.uk/victim/coming_forward/victim_personal_statement)

**This leaflet is also available in several different languages. Ask the police if you would like an alternative version.**



Criminal Justice System: working together for the public